

Kusoo dhowaaw maktabada Örebro!

Halkaan waxaa yaala buugaag ay caruur- iyo dad waaweynba akhrisan karaan, kuwaasoo ku qoran luuqado kala duwan. Waxaan haynaa buugaag cajalad ahaan loo dhegeysto, buugaag gaar ah oo cajalad lagu duubay, koorasyo dhinaca luuqada ah iyo wargeysyo. Si aad buugaag u deynsato waxaad u baahan tahay kaarka buugta lagu amaahdo. Kaarka buugta lagu amaahdaa waa saldhiga suurto geliya in la sameeyo hoy (konto) kaasoo loo isticmaali karo adeega dhinaca internet. Waxaad u baahan tahay kaarka amaahda si aad u isticmaasho kombiyuutarada maktabada yaal ama adeega internetka (Wifi)

Sidaan ayaad ku heli kartaa kaarka buugta lagu amaahdo

Kaarka amaahda ee ugu horeeyaa waa lacag la'aan. Si aad u hesho kaarka amaahda , ama aad lambarka kombiyuuterka lagu galo aad dooneyso inaad bedelato waa inaad wadataa teesaraha aqoonsiga. Waad ka amaahan kartaa buugta , waana soocelin kartaa buugta adigoo isticmaalaaya mashiinka aad isticmaali karto shaqaale la'aan. Waa inaad wadataa lambarka kombiyuuterka lagu galo, kaarka amaahda. Lambarka gaarka ah ee qofka , kombiyuuter iyo lambarka lagu galo kombiyuuterka. Caruurta ka yar 15 sano waa iney ogolaansho ka haysataan waalidkood

Wakhtiga amaahashada

Wakhtiga amaahashada sida caadiga ah waa 28 maalmood. Waxaa jira waxyaalo ka baxsan wakhtigaas. Haddii buugta ama waxa kale ee aad amaahato ay dad kale saf ugu jiraan, kolkaas wakhtiga amaahashadu waa ka yar yahay intaas. Wakhtiga aad dib usoo celineysid waxaad ka arki kartaa waraaqda cadeyneysa inaad dib usoo celisey waxii aad amaahatay.

Amaasho mar labaad

Haddii aan cidina saf ku jirin sheyga aad amaahatay, waxaad deynsan kartaa ugu badnaan 5 jeer.

Meel dhigid waxaad amaahaneyso

Markii buug meel lagu dhigo, waxaa fariin (SMS) laguugu soo dirayaa telefoonkaaga gacanta, sanduuqa boostada internetka, ama warqad laguugu sheegaayo inaad soo doonato buuga meel lagu dhigay. Waa lacag la'aan in buug meel lagu dhigo. Sheyga lagu keydiyey waxaad kasoo qaadan kartaa maktabad aad adigu dooratay oo ku yaal degmada.

Shuruudaha amaahashada

In la amaahdo buug waa lacag la`aan.

Adiga ayaa mar walba masuul ka ah in waxyaalaha aad amaahato aad dib usoo celisid wakhtiga loogu talagalay

Wakhtiga lasoo celinaayo waxaa ay ku taal warqada cadeyneysa inaad amaahatay buug.

Waxaad buugaagta ka amaahan kartaa ,aadna dib ugu celin kartaa hadba maktabada aad doonto ee ku taal degmada.

Haddii waxyaalaha aad amaahatay aad dib usoo celisid iyadoo la dhaafay wakhtigii la celin lahaa, kolkaas waxaa kugu waajib ah inaad bixiso lacagta daahitaanka iyo xasuusinta buuga.

Kharashka daahitaanka buugta waa: 5 kr/maalintiiba dadka waaweyn, filimada caurta iyo ciyaaraha tv-ga lagu ciyaaro.

Kharashka xasuusintu waa : 10 kr/ halkii xasuusin(xitaa waxyaalaha caruurta amaahdaan)

Waxii kale oo ku saabsan kharashaadka kale ka akhriso hoyga maktabka oo ah bibliotek.orebro.se/avgifter

Waa inaad bixisaa kharash haddii ay kaa dhumaan waxyaalo aad amaahatay ama ay burburaan ama inaad dib usoo celin.

Adigaa masuul ka ah waxii warbixin ah ee ku saabsan magacaaga iyo meelaha kale ee lagaala soo xiriiri karo sida ciwaanka, sanduuqa boostada ee dhinaca internet, lamabarka atleefoonka gacanta.

Adigaa masuul ka ah wax kasta oo lagu amaahdo kaarkaaaga maahashada. Sidaas darteed waa muhiim inaad kaarkaaga aad wax ku maahato inaad qof kale siin. U sheeg maktabada haddii uu kaarkaagu kaa dhumo, si loo joojiyo isticmaalkiisa.

Waalidka ayaa masuul ka ah waxyaalaha caruurta amaahdaan.

Warbixin buuxd aoo ku saabsan amaahashada waxaad ka heli kartaa hoyga bibliotek.orebro.se/lanevillkor

Maktabada gurigaad kasoo geli kartaa - bibliotek.orebro.se

Waxaad samayneysaa sidaan:

Ka raadi buugaagta keydka maktabada, dhegeyso ama soo degso buugaagta dhinaca internetka ah (e-böcker) ama muusiko, dalbo bil walba warqada wararka ee maktabada.

Soo arag howlaha ka socda maktabada – wakhti sheeko-xariir, booqasho qoraa iwm

Talooyin buugag iyo maqaalo quseeya arrimaha muhiimka ah ee caruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

Gal qaybta keydka dhinaca buugaagta ee internetka laga dhex helo. Taasoo sahleysa in la akhriyo buugaag kala duwan oo ka imaanaaya wadamo kala duwan, oo ah ilaa qiyaastii 50 wadan. Waxaad kaloo ka heleysa xaqiiq ku saabsan qoraa, wadamo, meelaha lacagta lagu kala bedesho. Waa inaad abuurataa boos ka mid ah keydka weyn ee buugaagta. Haddii uu qofku kombiyuuterkiisa ka samaysto, waxaa ka fiican inuu maktabka iyo dadka la shaqeynaaya uu la socdo., kolkaas adaa deynsan kartid ama dalban kara in lagu dhigo.

.